



*Macluumaad ku saabsan gaadiidka gaarka
ah ee ardayda dugsiga qaada*



**Växjö
kommun**

Ilmahaaga waxaa loo oggolaaday gaadiidka ardayda dugsiga, waxaana buuggan yar ku jira macluumaad loogu talagalay qofka ilmaha ka ma'sulka ah. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka ardayda dugsiga qaada, xeerarka masaafada ama habka go'aan-qaadashada, ka akhriso boggan macluumaad dheeraad ah: www.vaxjo.se/skolskjuts

Ardayda xaqa u leh waxaa la siinayaa gaadiid ardayda dugsiga ee gaarka ah kuwaas oo la geeyo lagana soo qaado dugsiga hoose/dhexe ee carruurta la waafajiyay: Kungsmadskolan, Ljungfälledugsiga, Hagavik, Högstorp **och** Östra Lugnet **samt resurs**-qaybaha: Sofieberg **och** Pär Lagerkvistskolan.

Gaadiidka gaarka ah ee ardayda dugsiga qaada ma aha in loo arko safaro taxi oo gooni-gooni ah, balse waxaa loo arkaa tiro waddooyin go'an oo leh jadwal waqtiyeed kaas oo tilmaamaya waqtiyada bixitaanka oo qiyaas ahaan ah. Waddooyinka gaadiidku badanaa waxay ka bilaabmaan meelaha ugu fog fog ee degmada, iyagoo ku socda jihada bartamaha Växjö subaxnimada, halka jihada safarku ay noqoto mid ka soo horjeedda markay maalinta dugsigu dhammaato. Waqtiyada bixitaanka ee gaadiidka ardayda dugsiga waxaa loo habeeyey si ay ula jaanqaadaan jadowalka waxbarashada si ay ardaydu maalin kasta u yimaadaan dugsiga waqti ku filan inta aanu dugsigu bilaaban ka hor. Safarrada ay dib ugu laabanayaa guriga badanaa waxay baxaan qiyaastii toban daqiiqo ka dib markay maalinta dugsigu dhammaato.

Qaybinta mas'uuliyadda

Waalidiintu waxay mas'uul ka yihiin ardayda ilaa ay ka fuulayaan gaadiidka dugsiga Waalidiinta ayaa mas'uulka ah ardayda inta ay ka fuulayaan gaadiidka dugsiga ee meesha loogu talagalay inuu ka raaco, iyo sidoo kale markay ay ka soo degaan baabuurka meesha loogu talagalay marka uu dhammaado wakhtiga dugsigu. Shirkadda gaadiidka waxay mas'uul ka tahay ardayda iyada oo loo marayo darawalka gaadiidka wada inta ay ardaydu safarka ku jiraan marka loo socdo dugsiga iyo marka laga soo laabanayo, iyo in la raaco xeerarka taraafikada ee jira. Haddii ay dhacdo waxyeello ama loola dhaqmo si meel ka dhac ah inta lagu guda jiro safarka baabuurka dugsiga, maamulaha dugsiga ayaa mas'uul ka ah inuu baaritaan ku sameeyo arrintaas.

Xeerarka ammaanka

Fuulista baabuurka- iyo ka deggistu waa inay u dhacaan si deggen. Ardaydu waa inay si deggen u fadhiyaan inta lagu guda jiro safarka baabuurka. Waa in la isticmaalo suunka badbaadada.

Su'aalaha ku saabsan gaadiidka ardayda dugsiga waxaa ka jawaabaya, mas'uulka qaabilsan gaadiidka ardayda dugsiga

- **0470-410 00**
- **skolskjutsgruppen@vaxjo.se**
- **www.vaxjo.se/skolskjuts**

Beddelka baahida gaadiidka ardayga dugsiga

Soo sheeg isbeddellada joogtada ah ee baahida gaadiidka ardayda dugsiga, tusaale ahaan isbeddelka xaaladda guriga (cinwaan cusub) u soo sheeg xafiiska dugsiga ama mas'uuliyiinta qaabilsan gaadiidka ardayda dugsiga. U soo sheeg isbeddellada ku meelgaarka ah ee gaadiidka ardayda dugsiga-tusaale ahaan haddii uu ilmahaagu jirado:


- **Busspecialisten 0470-782 782**
- **avbokning@busspecialisten.se**

Gaadiidka ardayda dugsiga iyo daryeelka wakhtiga gaaban

Go'aanka uu gaaro qofka qaabilsan gaadiidka ardayda dugsiga ka dib, waxaa la samayn karaa gaadiid u dhexeeya gaadiidka ardayda dugsiga iyo goobta daryeelka wakhtiga gaaban (korttidstillsyn) marka uu jiro habeen dhax waa la ogolaan karaa.

Raacitaanka saaxiibada

Raacitaanka saaxiibada waxaa gacanta ku haya dugsiga uu ardaygu dhigto. La xiriir shaqaalaha dugsiga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



Waa maxay gaadiidka ardayda dugsiga ee gaarka ahi? Gaadiidka ardayda dugsiga gaarka ahi waa gaadiid maalinle ah oo ardayda loogu talagalay inta u dhaxaysa cinwaannada guriga iyo goobta loogu talagalay dugsiyada hoose dhexe iyo cutubyada kheyraadka (**resursenheter**). Gaadiidka ardayda dugsigu waxa uu dhacaa badanaa iyadoo la adeegsanayo gaadiidka ardayda dugsiga ee qandaraaska lagu qaatay. Xaalado gaar ah, gaadiidka ardayda dugsiga waxaa bixin kara gaadiidka dadweynaha (**kollektivtrafik**).

Su'aalaha ku saabsan gaadiidka ardayda dugsiga waxaa ka jawaabaya, mas'uulka qaabilsan gaadiidka ardayda dugsiga 0470-410 00, skolskjutsgruppen@vaxjo.se www.vaxjo.se/skolskjuts



Växjö
kommun